**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
XUKUUMADDA FEDERAALKA
WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة النقل والطيرا ن المدني

SOMALI FEDERAL REPUBLIC
**The Ministry of Transport and Civil Aviation**
**Office of The Minister**

**REF: MTCA/OM/200/2018** **Date:06/03/ 2018**

**Ku: Gudiga midawga Shirkadaha Diyaaradaha**
**Og: Gudiga Adeega Shirkadaha diyaaradaha**
**Og: Midowga Wakiilada Dulimaadka iyo Dalxiiska Somaliyeed (SATTA)**
**Og: Favori LLC**
**Og: Hay'adda Duulista Rayiska iyo Saadaasha Hawada (SCAMA)**
**Og: Maareeyaha Guud ee Maamulka iyo Amniga Garoonka**
**Og:Wasiirku-xigenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawadda**
**Og:Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada**

**Ujeedo:Dhawrida Xuquuqda Rakaabka diyaardaha ee (shacabka)**

Waxaa Wasaarada Gaadiidka iyo Duulista Hawada (WGDH) soo gaaray cabashooyin kusaabsan rakaab lasoo geliyo garoonka iyadoo aanay diyaaradii qaadi lahayd diyaar ahayn taasoo keentay in ay rakaabkii oo ay ku jiraan caruur, dumar, rakaab caawimaad ubaahan iyo waayeel oo ay joogaan garoonka gudihiisa mudo dheer amaba ay waayaan diyaaradii ay sugayeen, dibna ugu noqdaan magaalada.

WGDH oo kaashaneeysa qaybaheeda kala duwan oo u xilsaaran habsami u socodka duulimaadyada iyo rakaabka ayaa waxa ay hada wadaa baaritaan la xiriira arintan, waxaana talaabo waafaqsan sharciga laga qaadi doonaa shirkadii ay ku cadaato jebinta shuruucda duulimaadka rayidka iyo ilaalinta xuquuqda rakaabka.

Hadaba natiijooyin horudhac ah oo la xiriirta baarintaankan ayaa qasab kadhigay in ay WGDH soo saarto digniinta hoos ku xusan.

1. In rakaabka soo galo garoonka ugu badnaan sedex saac kahor waqtiga duulimaadkooda.
2. In rakaabka aanan lagu hayn karin garoonka gudihiisa mudo ka badan sedex saacadood, hadii aanay diyaaradii ay raaci lahaayeen ku imaan cilad duulimaadkeeda halis geli karta.
3. In diyaarad ay sugayaan rakaabkeedii aan la kireyn Karin iyadoo laga tagayo rakaabki sugayay diyaaradda (charter flight).
4. In dhamaan shirkadaha diyaaradaha ay Hay'adda Duulista Rayidka (SCAMA) usoo gudbiyaan jadwalka (flight schedule) duulimaadkooda oo bille ah(Monthly).

Email: mohamed.salat@motca.gov.so TEL: +252619175373

5. In ay dhamaan duulimaadyadu ku shaqeeyaan waqtiga ku xusan jadwalkooda, hadii ay wax ka bedelayaana ay ugu yaraan todobo (7 days) ka hor soo ogeeysiiyaan SCAMA.

Hadaba waxaa la farayaa dhamaan shirkadaha duulimaadyada in ay u hogaansamaan wareegtadan oo dhaqangeleysa March 6-2018.

Cidii ku xad gudubta qodobada kor ku xusan waxay wajihi doontaa.

I. Shirkadii Marka koowaad gasho danbiyada kor ku xusan waxaa la ganaaxi doonaa ($2,000 labo kun oo dollar)

II. Sharkadii marka labaad gasho danbiyadan kor ku xusan waxaa la ganaaxi doona ($2,000 kun oo doolar iyo shaqo kajoojin 7 cisho ah)

III. Shirkadii Marka sadexaad gasho danbiyadan kor ku xusan waxaa laganaaxi doonaa ($2,000 kun dollar iyo in laga la laabto ruqsada shirkadaas ay ku shaqayso dhinaca Hay"adda Duulista iyo Saadasha Hawadda.

**Wabillahi Towfiiq**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WASAARADDA
MINISTRY OF TRANSPORT & CIVIL AVIATION
WASAARADDA GAADIIDKA & DULISTA HAWADA

**Md: Mohamed Abdullahi Salat**

**Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada (DFS)**

Email: mohamed.salat@motca.gov.so TEL: +252619175373